# JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

PJ
2531
.K48
1979

Maxamed Siyaad Barre,

**KHUDBADDII MADAXWEYNAHA**

**JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA**

**JAALLE MAXAMED SIYAAD BARRE,**

**KA JEEDIYEY 10 - GUURADA KACAANKII 21 OKTOOBAR**

INDIANA UNIVERSITY
LIBRARIES
BLOOMINGTON

MUQDISHO
21 Oktoobar 1979

KHUDBADDII MADAXWEYNAHA
JAMHUURIYADDA DEMOQRAADIGA SOOMAALIYA
JAALLE MAXAMED SIYAAD BARRE KA JEEDIYEY
10-GUURADA KACAANKII 21 OKTOOBAR

JAALLEYAAL:

Dadweynaha Soomaaliyeed, meel kasta oo ay joogaanba, waxaan u soo jeedinayaa salaan diirran iyo hambalyo ku aaddan xuska dabbaaldegga £ 10-Guurada Kacaankooda. Martida sharafta leh ee na soo booqatay si ay noogala qayb galaan xuskan qaayaha leh, waxaan iyana aan u celinaynaa mahadnaq iyo xusuus qaddarinta ay dadka Soomaaliyeed iyo Kacaankiisa u hayaan.

JAALLEYAAL:

Cimriga ummadaha iyo socdka taariikhda marka loo eego, toban sannadood waa muddo aad u gaaban. Isbeddelka taariikhda iyo nolosha aadanaha waxaa lagaga qiyaas qaataa waqtiyo dhaadheer oo ah qarniyo iyo wax ka badan. Ha yeeshee waxaa dhacda mar marka qaarkood in isbeddello iyo dhacdo badani isugu yimaadaan oo ku kulmaan muddo gaaban, muddadaas oo markaas nolosha ummaddaas ula qiimo noqota waqtiyo dhaadheer, laakiin arrimuhu si qabow isaga luudayeen.

Tobankii sannadood ee dadkeennu halgan kacaan ah ku soo jiray waxaa lagu tilmaami karaa inay innoola mid yihiin muddooyinka noocaas ah. Muddadaas yar ee urursan waxay ahayd mid socodka taariikhda iyo isbeddelka ku dhacaya nolosha dadka Soomaaliyeed dhaqso la yaab leh ku socday. Waxay ahayd muddo aynnu giddigeenba ku jirnay guclo orod, kadle

iyo xawaare si aan isbeddel run ah, oo min gun ilaa baarba saameynaya, uga geysanno nolosheenna. Orodkaasi halkee buu inna soo gaadhsiiyey, maxaan soo guudubnay, maxaase innoo dhiman? Isweydiintaas intaan jawaabteeda la guda gelin waxaa ka horreysa isweydiin kale; Maxaan ku sugnayn intii aynaan gucla-reorka kacaannimo bilaabin ka hor ?

Wax badan baynnu, Jaalleyaal, isu sheegnay, isuna tilmaannay xaaladda aan ku sugnayn kacaanka ka hor. Isu timaankaasu waa kii uu ku dhisnaa isbaraarujiskeennii badnaa, waa kii u sal ahaa qorshaheenna, waa kii wajahayey waxqabadkeenna. Ku-celcelista isu-tilmaanka xaaladdaas waxaa laga yaabaa inay dadka qaar ula muuqato wax laga daalay. Annaga nalama aha. Maxaa wacay, mar hadduu qofku illaawo halka uu ka soo kacay, iyo waxa uu soo maray, uma suurtoobayso inuu isha ku hayo meesha uu ku socdo, iyo waxa ka horreeya. Haddaan mar kale soo koobo waxaa kacaanku dhashay iyadoo dadka Soomaaliyeed, badh gumeysi ku jiro, intii gobannimada haysatayna ay ku noolyihiin hab lagu sheego gumeysiga cusub: taasoo macnaheedu yahay inay ummadda ka luntay ujeedadii gobanimadu, inay, iyadoo ismoodaysa inay xor tahay, haddana weli arrimaheeda aayaheeda siyaasadeed iyo dhaqaaleedba xukumaya weli shisheeyihii si dadban isagu uga taliyo. Gaar ahaan dhinaceenna waxay taasi keentay in markii dadku jahawareereen, luntay midnimadii iyo haybaddii dawladnimo, loo noqday qabiilkii, nabaddii iyo jiritaankii

ummaddu halis gashay, iska dhaaf wax qabadoo. Waa tii markii xaalku heerka s gaadhay Ciidammada Qalabka Sida ay gadoodeen oo ay curiyeen Kacaankii 21 Oktoobar, iyagoo ka tarjumaya dareenka dadweynaha kana helay taageero iyo hambalyo buuxdaba.

Waa taan wax badan isu sheegnay himilada Kacaanku waxay ahayd. Waa lama huraane aan mar kale toban sano ka dib is xusuusinno. Himilada kacaanku wax kale may ahayne waxay ahayd laba kaclayntii himilada gobanimada: in dadka Soomaaliyeed ka baxo gumeysiga iyo gumeysiga cusub, inuu raadiyo aaya-ka-talintiisa iyo midnimadiisa xalaasha ah, inuu isagoo u madaxbannaan dib-u-dhiso noloshiisa dhaqaale, siyaasadeed iyo bulshaba, inuu, isagoo dhabbaha hor-u-marka ku jooga, xidhiidh wanaagsan la yeesho quruumaha kale ee dunida, isagoon cidna qool midiidinnimo ah isugu xidhin.

Si loo dhaqan geliyo himiladaas waa kii Kacaanku barnaamij cad dejistay. Barnaamijkaas hirgelintiisa wuxuu kacaanku la kaashaday mabdâ'a hantiwadaagga, isagoo cuskanaya waaya-aragga taariikhda dunidaiyo dalkeennaba iyo dhaxalka cilmiga ah ee aadanuhu isu reebo. Waa tii sidaas lagu caddeeyey Axdigii Labaad ee Kacaanka.

Hantiwadaaggu, sida la ogyahay, waa hab cilmi ah oo loo maro isbeddelka dhaqan-dhaqaale si aan loo marin habaabin. Sidaa darteed Kacaanku wuxuu jeexday qorshe

ballaadhan oo iska kaabaya dhinaca dhaqaalaha, dhaqanka iyo siyaasaddaba. Qorshe dhaqaale intaan lagu dhaqaaqin wuxuu u baahan yahay sal iyo saynsaab. Taasaa keentay in la toleeyo waaxyaha mudan ee dhaqaalaha sida Wershadaha waaweyn, bangiyada iyo ganacsiga dibedda, in la xoojiyo qaybta Dawladda iyo iskaashatooyinka, iyadoon la illoobayn dhaqaalaha gaarka ah ee dadka hantida lehi iskooda u maamushaan. Taasaa keentay in maamulka guud la baahiyo, la kala fududeeyo hawlaha Wasaaradaha, la abuuro Wakaalado badan oo madaxbannaan, kala qaab-bilsanna dhinacyo badan oo saamaynaya nolosha dadka Soomaaliyeed, la sameeyo Gobollo iyo Degmooyin badan si u-adeegga danaha dadweynaha ku kala firidhsan dalka loo hanan karo.

Intii Kacaanku jiray waxaynnu soo marnay laba qorshe (mid saddex sannadood ah, 1971-73), iyo mid shan ah 1974-78). Kii saddexaadna (1979-81) haddaan ku guda jirnaa. Intuba waxay habeynayeen, welina ay habeynayaan, horumarka dhaqaalaha iyo dhaqanka dadka Soomaaliyeed. Iyagoo dhinac walba taabanayey, haddana waxay mudnaanta hore siinayeen qaybaha wax-soo-saarka (sida beeraha, wershadeynta, xoolaha iyo kalluunka), isgaadhsiinta iyo gaadiidka, biyaha iyo baadhista macdanta, iyo waxbarashada, iyadoon la illoobin caafimaadka, maamulka guud iyo amnaanka iyo difaaca dalka.

Iyadoon faahfaahin badan loo gelin, taasoo ku cad qiimaynta/qorshayaashaas iyo kutubo kale oo la soo saaro, haddana waxan jeclahay inaan meelaha qaarkood wax yar ka taataabto.

Beeraha waxa Kacaanku u arkay inay yihiin saldhigga horumarinta dhaqaalaha. Himilada laga lahaana waxay ahayd ka haqabtiridda dalka xagga cuntada, helidda tacabka beeraha ee Wersheduhu u baahan yihiin, iyo kordhinta waxa dibedda loo dhoofiyo. Sidaa darteed ayaa qorshe walba laga siinaya qayb mudnaan leh. Ilaa tan iyo maantana waxa hirgelay mashaariic fara badan.

Xooluhu waa hantida u weyn ee dalkeennu deeq u leeyahay. Xannaanayntooda iyo horumarintooduna waa lama huraan. Sidaas awgeed ayaa lacag badan loo geliyey daawada xoolaha iyo dabargoynta cudurrada hela oo qaarkood sida dabakarruubka lagu guulaystay. Markii la ogaaday in abaaruhu had iyo jeer xoolaheenna waxyeeleeyaan waxa lagu dhaqaaqay la dagaallanka nabaadguurka iyo horumarinta daaqa oo maanta meel wanaagsan laga marayo.

Kacaanka ka hor Kalluunku wuxuu ahaa wax aan la daaqayn, lana garanayn kaalinta uu ka qaadan karo kobcinta dhaqaalaha. Markii la iska xil saaray ka faa'iideysiga badda waxa la habeeyey barnaamijyo baraarujin iyo mashaariicba leh. Waxaa la dhisay iskaashatooyinka,

danwadaagaha iyo sharikadaha kalluumaysiga, iyadoo lagu kaabi doono dugsiga badda, dekedaha yaryar iyo qaboojiyayaal.

Wershedaynta dalku aad bay u kobocday muddadii Kacaanka, taasoo ay ugu wacnayd maalgelinta lixaadka leh ee kacaanku u leexiyey dhinaceeda. Wershedo tiro badan oo waaweyn iyo yar yarba leh ayaa la hirgeliyey. Taasina waxay keentay koboc dhaqaale iyo abuuritaan shaqo. Siyaasadda wershedayntu waxay ku fadhidaa ka faa'iidaysiga waxa dalka ka soo baxa sida beeraha, xoolaha, kalluunka iyo macaadinta, ka kaaftoonka waxa dibedda laga keeno si loo dhowro lacagta, shaqo abuurid iyo kordhinta dhoofintaba.

Macdantu waxay ka mid tahay khayraadka dhex jiifa dhulkeenna haddii aan loo guntan baadhisteedana, koritaanka dhaqaaluhu waa kii hakada. Sidaa darteed ayuu Kacaanku maalgelin u qoondeeyey baadhista macdanta, biyaha iyo saliiddaba. Iyadoo natiijooyin wanaagsan laga gaadhay baadhistaas waxaa hubaal haddii la sii wado inaynu la soo bixi doonno.

In kastoo dhibo badan oo aan soo sheegi doonnaa innala soo kulmeen, haddana qorshayaashaas iyo tacabkii la geliyey waxay keeneen in dhaqaalaha dalku kordho sannadkiiba 4.1% . Waxase lama huraan ah in dadaalka la sii kordhiyo, xoog intii hore ka weynna la saaro qaybaha wax-soo-saarka, si aan u raadtirno gaajada iyo darxumada.

....

Waxaan kale jeclahay halkan inaan si gaar ah ugu xuso horumarka laga gaadhay dhinaca tacliinta. Tusaale gaaban haddaan soo qaadanno ardada dugsiyada dhigataa waxay 1970kii tiradoodu ahayd 54,651 maantana waxay maraysaa 285,003 (iyadoo 3002 ka mid ahi yihiin ardada Jaamacadda oo Kacaanka ka hor wax la sheego aan ahayn). Waa korodhsiimo gaadhaysa 421% . Waxaa intaa dheer qorista afkeenna hooyo, ee gumeysigu damcay inuu hagaasiyo, iyo xoojinta afka carabiga horumarka wanaagsan ee laga gaadhay, iyo ol-olayaashii aan ku raad tiraynay wax-akhris-la'aanta oo adduunku innoo qiray inay tahay tallaabo waxtar iyo ku dayashaba leh.

Caafimaadka daryeelkiisa, in kasta oo heerka tacliinta oo kale aynaan ka gaadhin, haddana baahintiisa iyo gaadhsiintiisa dadweynaha aad baa loogu dadaalay. Waxa iyana dabargoyntooda lagu dhaqaaqay cudurro badan oo faafa. Waxa lagu guulaystay dabargoynta furuqa oo maanta dunidu markhaati innooga tahay, kuwa kalena heer fiican ayey laga marayaa.

JAALLEYAAL:

Waxaan tilmaamay in, innagoo dhabbahaa horumarka een qorshaysannay ku joogna, ay innala soo derseen dhibaatooyin culculus. Waxa ka mid ahaa dhibahaas duufaanno, daacuun iyo abaartaan u bixinnay "Daba-dheer" ee dad iyo duunyaba naafeysay. Sidaan ugu jilib dhignay ee innagoo isku duuban ugu guntannay inaan ka gudubno, kuna guulaysannay isaga warramimaynno. Marag baan u wada ahayn. Waa taan dadkii tabaaloobay guri barwaaqo aan u rarnay, maantana Danwadaagihii loo sameeyay ay higsanayaan jidkii loogu tala galay.

Waxaa innala soo dersay taakulayntii halganka xaqa ah ee dadyowga aaya-ka-talintooda iyo xornimadooda u xusul duuban, gaar ahaan dadka Soomaaliyeed ee weli gacanta gumeysiga ku hadhay, arrintaas oo aan gadaal ku sii faahfaahin doono. Waxa kale oo innala soo dersay, welina jira, dhibaha ka taagan dhaqaalaha dunida oo dalalka soo korayaa ka siman yihiin. Shidaalkii baa cidhiidhi galay, lacagihii iyo sarrifkoodiibaa sabbeeyey oo salguuray, bucshuradii ayaa qaaliyowday, cunno iyo cayn walba.

Shaki ma leh in intaasoo dhibo ahi hakinayaan qorsha la dhigto iyo horumarkii la gaadhi lahaa. Waxaabay ku dhowyihiin qaar wax kufiya. Kufiddu waa tu

cadowga dadka Soomaaliyeed filayey. Ha yeeshee in la kufo daayoo, intaan ka lib helnay dhibahaas badankooda ayaan weliba hore u soconnaa. Sidee bay innoogu suuro gashay ?

Maaha wax cusub oo aan hadda sheegaynno haddii aan nidhaa sirtu waa qorshaha hantiwadaagga. Maxaa yeelay waa nidaam wata isku duubni, ismaqal, sinnaan, u danaynta danta guud, mitidnimo oo marka ay weheliso daacadnimo dhib kasta kaa gudbinaya.

Nidaamka caynkaas ah ayaan ku dhaqaannay oo aan hirgelinay. Waatii Kacaanku tallaabo-tallaabo u guubaabiyey dadka, garaadkooda ku beeray waddaninimo iyo afkaarta hantiwadaagga, isagoo abaabul siyaasadeed iyo iskaa wax-u-qabsoba isku daraya. Halgankaas heer-heerka lahaa, ee kaabaya qorshaha dhaqan-dhaqaale ayaan u dhabar adaygnay ilaayoo laga gaadhay dhidib-u-aasidda Xisbiga nooca cusub iyo ururradiisa bulsho.

Asaasiddii Xisbiga hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed waxaynnu isu ballan qaadnay in dalka loo sameeyo dastuur cusub iyo Gole Shacbi oo dadku soo doortaan. Ballankaas qaarkii waynnu fulinnay oo waa taan dhowaan afti xor ah ku oggolaannay dastuurkii Xisbigu soo bandhigay. Waxa innoo dhiman inaan ballanka intiisii kale oofinno. Taasoo ah inaan soo dooranno Gole Shacbi ama barlamaan. Waa inaynnu hawshaas ku dhammaynaa sannadkan dabayaaqadiisa. Markaas ayuu kaamil innoo

noqonayaa qorshihii siyaasadeed ee aan dejisannay, kaabayeyna kan dhaqan-dhaqaale. Markaas ayeynnu dhidibbada u aasaynnaa, tiirarkana u adkayneynaa, nidaam hantiwadaag ah oo dimoqraadiya oo waara, lehna Xisbigiisa nooca cusub, ururradiisa bulsho, iyo Gole Shacbi oo dadweynuhu dhammaan si xor ah u soo doorto. Markaas ayey, sidii Kacaanku bilowgiiba ku dhaqaaqay, Xisbiguna sii xoojiyey, Barlamaankuna dhanmaystirayo, talada dalka iyo maamulkiisuba noqonayaan wax loo dhan yahay oo wada jir ah, oo qof waliba kaalinta kaga aadda si nidaam leh u guto. Marka Golaha Shacbigu dhismo, Dawladda ka soo dhex baxdaa waa inay noqotaa mid, iyadoo fulinaysa dastuurka qaranka iyo barnaamijka Xisbigaba, hore u sii wadda halganka horumarka, dhibaha haatan jira iyo kuwa horimaan doonaba si firfircooni, adadayg iyo isla tashi leh uga baxda.

Nidaamkaas cusub ee hantiwadaagga ah ee dimoqraadiga ah ee aan habaysannay waa mid ka soo dhex baxay nolosha dadkeenna iyo dantiisa. Ummad weliba iyadaa doorata nidaamka ku habboon, mana noqon karo wax dibed looga keeno. Nidaamkaas aan u doorannay aayaheenna maaha mid aan weligeen ka leexan doonno.

JAALLEYAAL:

Haddaan u gudbo xagga siyaasadda dibedda, waxaan idiin xusuusinayaa inaan Shirweynihii aan caadiga ahayn ee Xisbiga lana qabtay 20kii Jannaayo ee sannadkan nidhi:

....

"Siyaasadda dibedda qaruun kastaa waxay ku dhisan tahay laba qaybood oo lama huraan ah:-

(1) Qayb u adeegta danaha gaar ahaaneed ee qarankeeda, ee xaqa ah, taasoo xadidda ballamadeeda, xeer-dawladeedka iyo heshiisyada ay gelayso.

(2) Qayb u adeegta danaha guud ee adduunweynaha, kuna lug leh mas'uuliyadda qarankaas ka saaran sidii ifka loogu wada noolaan lahaa nabadgelyo, iskaashi iyo baajin wixii iska horimaad iyo khilaafaad ah."

Waxaynnu isla shirkaas isku xusuusinnay qodobbadii lixda ahaa ee Kacaanku ayaantuu curtay dejiyey si ay u noqdaan salka siyaasaddeenna dibedda, iyo halka aynnu ilaa markaa ka gaadhnay fulintooda.
Waxaynnu shirkaas ku gorfaynay, go'aannana ka gaadhnay arrimo badan oo ku lug leh xidhiidhkeenna dawliga ah. Isagoo raadkii Shirweynuhu weli qoyan yahay, ma rabo inaan ku wada noqdo qodobbadii oo idil. Waxanse jeclahay inaan xusuus ahaan sii xoojiyo dhawr arrimood.

Hor iyo horraanba Kacaanku waa kii qoondaystay siyaasad xor ah, dhexdhexaad ah, kuna dhisan nabad ku-wada noolaanshaha dunida, taageeridda xaqa iyo gobanimada ummadaha, iyo xushmaynta xeerarka caalamiga ah. Khadkaas Kacaanku jeexday ma ahayn mid kidis iyo laab-la-kac ku yimid. Bal wuxuu ahaa mid ka dhashay waayo-aragga dalkeenna, xidhiidhka dawliga ah ee casrigan jira, iyo danaha dadkeenna.

Barnaamijka siyaasadda dibedda iyo kan guduhu waxay ahaayeen laba iskaabaya. Maxaa yeelay siyaasadda dibeddu, iyadoo ah muraayaddii siyaasadda gudaha, waa inay had iyo jeer u adeegtaa danaha guud ee saamaynaya horumarka, midnimada iyo jiritaanka qaranimo.

Kacaanku, isagoo taas ogsoon, waa kii si firfircoon ugu dhaqaaqay in Soomaaliya ka soo baxdo kaalinta kaga aaddan siyaasadda dunida. Waxaa marag innoogaga filan dowrka diirran ee aynnu ka qaadannay shirarka Ururrada Caalamiga amaba Gobolba sida Ururka Jaamacadda Carabta, Ururka Midowga Afrika, kan Qaramada Midoobay, Dhaqdhaqaaqa Dawladaha Dhexdhexaadka ah, iyo Ururka Ummadaha Islaamka ah. Waxa marag innoogaga filan sida ballaadhan ee uu u fiday xidhiidhkeenna dibloomaasiga, booqashooyinkii, iyagoo heerar kala duwan leh, lagu kala bixiyey dalal aan la koobi karin, amaba dalkeenna ay ku yimaadeen madax dawladeed, axsaab, ururro bulsho iyo dad kale oo qaddarin mudan. Waxaan shaki ku jirin in dadaalkaas taxanaha ahaa u soo hooyey dalkeenna sumcad wanaagsan, xushmo iyo qaddarin, iyo inuu fekradaha aan ka qabno mushkiladaha dunida ka taagan faafiyey.

Tiirarka waaweyn ee siyaasaddii dibedda ee Kacaanku dejiyey waxaa ka mid ahaa taageerada dadyowga u halgamaya madaxbannaani, aayo-ka-talin, iyo xornimo. Taas wax la yaab leh maaha. In quruumuhu helaan madax-bannaanida ay xaqa u leeyihiin waa mabda' ay qirsanyihiin

Xeerarka caalamiga ah oo idili sida kuwa ummadaha Midoobay iyo Ururka Midowga Afrika. Soomaaliya intaba xubin ayey ka tahay, way u hoggaansan tahay xeerarkaas, waana dawlad madaxbannaanideeda waqti aan fogeyn ku heshay halgan ay la gashay gumeysiga. Sinaba uma suurtowdo, markaas, inaanay wixii tamarteeda ah u fidin gacan taageero dadka iyagu maanta ku jira halgankaas.

Waa wax la wada ogsoon yahay oo aan ku celcelis u baahnay sidii caddanka ahayd ee aan ula safannay gobanimadoonka Afrika, dawladaha kale ee Afrika iyo adduunkabana ku guubaabinnay in la xoojiyo taageeradooda ilaayoo ay ka gaadhayaan xornimo. Waxaa tobankii sano ee inna soo dhaafay ku guulaystay halgankoodii oo maanta dawlado xor ah Moosambii: Angoola, Gini-Bisaaw, Gacanka Cagaar, Jabuuti, Saa'o Toome & Birinsibe, Komooro, iyo Sishelis. Waxaa weli halgankoodii ku gudo jira dadyowga Simbaabwe, Namiibiya, Koonfur Afrika, Soomaali Galbeed, Abbo iyo Eriteria. Iyana waa kuwii hubaal ahaan hantiya himiladooda ah xornimo iyo ayaa-ka-talin.

Gobanimadoonka Simbaabwe way ku dhowyihiin inay gaadhaan guusha. Waxaana hubaal ah in Gobanimadoonku halgankooda halkii ka wadayaan, iyagoo haysta taageerada ummadaha xaqa jecel oo idil.

Dawladaha Midabtakoorka Koonfur Afrika waxay weli ku adkaysanaysa inay baajiso xornimada Namiibiya. Taasina wax u suuragelaya maaha. Hubaal waxa guulaysan doona Gobanima doonka. Ha yeeshee, xil weyn ayaa ka saaran Afrika iyo adduunweynahaba sidii Koonfur Afrika loogu qasbi lahaa inay faraha kala baxdo Namiibiya. Waxaa kale oo xil weyni ka saaran yahay Afrika iyo Adduunweynahaba sidii Koonfur Afrika looga tirtiri lahaa midab gumeysiga, dadyowga ku noolina xaqoodii aadaninimo oo buuxa u heli lahaayeen. Waa in la gartaa in inta midabtakoor jiro nabadduna halis ku jirto.

Waxaa dad badani isdiidsiiyaa in Dawlad Afrikaan ah oo madoobi gumeysi noqon karto iyadoo Afrika oo dhammi gacanta u gashay gumeysigii Reer Yurub. Gumeysiguse midab ma leh. Hore ayey taariikhda Yurub iyo meelo kaleba uga dhacday in dad isku mid ahi mid ka kale gumeysto. Dadyowga Soomaali Galbeed, Abbo iyo Eriteriyana waa kii sii wada halgankooda ilaa xaqooda la aqoonsado, xornimadoodana ay hantaan. Maantana dad badan baa runtii u muuqatay, taariikhdaannu annagu ogeyn ee imbaraddooriyadda Xabashida, kuna dhisnayd dal ballaadhsi iyo liqidda dadyowga u dhow waxay noqotay mid cad oo kashifan.

. . . . . .

Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxay ku dadaashay intii tamarteeda inay ku kaalmayso talisyadii kala duwanaa ee Addis Ababa siday xal siyaasiya oo caadil ah arrinta ugu heli lahaayeen. Waxayso la kulantay dhega owdan, haddidaad iyo weerar. Soomaaliya, markaa, waajibkii ka saarnaa difaaca dalkeeda iyo taageridda xaqa ayey gudatay. Macangagnimada Xabashida ka sokow waxa sii qallafsiiyey xaaladda Geeska Afrika faragelinta quwado shisheeye. Quwadaha shisheeye waa inay gartaan in salka arrintu tahay dadyow dulmiga diidaya, weligoodna cabdudhis lagu hayn karayn, iyo kii dulmayey oo iska horjeeda. Inta ay xoog ku taageerayaan talis gumeysi ah, wejiyo kastuu isu yeelaba, arrinta xal loo helimaayo. Xitaa dowladahaas waxay dantoodu ku jirtaa inay faraha kala baxaan dabka, saaxiibtinnimada dhabta ah ee dadyowgana tixgeliyaan. Arrintu si kastaba ha ahaatee Soomaaliya sideedii hore ayey diyaar ugu tahay inay gacan ka geysato sidii xal caadil ah, nabada oo waara loo gaadhi lahaa. Soomaaliya dal ballaadhsi ma qabto. Dhibta meesha taallaa waa dadka la gumeysanayo oo ay tahay inay helaan ayaa-ka-talintooda. Talisyada Addis Ababa iyagoo raba inay qariyaan xaqiiqada ayey ilaa maanta Soomaaliya ku hayaan haddidaad iyo cagajugleyn. Shacbiga Soomaaliyeed weligiis xaqiisa kama hadhin, waa u heegan difaaca naftiisa, mana noqon doono jid laamiya oo lagu durduriyo.

JAALLEYAAL,

Waxaa dhowaan Golaha Dhexe go'aan ku gaadhay in amar degdeg ah la soo saaro oo ku saabsan dhibaatooyinka culculus ee ka dhashay qaxootiga faraha badan ee si isdaba jooga ugu soo qulqulaya Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya. Waxaa go'aankaasi ku guubaabinayey dad Soomaaliyeed ee Jamhuuriyadda deggan inay u gurmadaan walaalahoodaa dhibban, ee u baahan cunno, daawo, hoy iyo hu'ba. Gurmadkaasu waa lama huraan waayo in kasta oo kaalmo dibedda ahi timaaddo haddana kuma filna. Qaxootigaas qaarkood waa dad caydh ah oo maal iyo guryaba beelay, ayna qasab ku noqotay JDS inay u sameyso meelo lagu xannaaneeyo. Qaar kalena waxay ku kala baahsan yihiin magaalooyinka Soomaaliya. Geddigoodba waa dad ka soo baxay guryahooda, waxa ka soo eryeyna waa dilka, dhaca iyo cadaadiska ay ku hayaan habeen iyo maalin Ciidammada Gumeysiga Xabashida ee dalkooda haysta iyo kuwa taageeraa. Waxaannu ugu baaqaynaa mar labaad adduunweynaha in loo soo gurmado dadkaas tabalaysan oo noloshooda la badbaadiyo. Waxa kale oo aannu ugu baaqaynaa dowladaha iyo ururrada caalamiga ah in daawo loo helo sababta, taasoo ah in dhulkooda nabad laga dhaliyo, cadaadiskana laga dul-qaado.

Sida gobannimadoonka Afrika oo dhan ay Soomaaliya ula jirto, ayey u garab taagnayd welina u

garabtaagan bahay halganka ummadda Carbeed ugu jirto qadiyaddeeda. Dadka Soomaaliyeed ayagoo aaminsan in aayahooda iyo kan ummadda Carbeed aanay sinnaba u kala maarmayn, weligood wax kalamay hadhin raadinta xaqa carbeed. Waxaannu aaminsannahay in dhibaatada Bariga Dhexe si looga gaadho xal nabad oo kama dambeys ah in Dawladda Yuhuuddu ka kacdo dalalkii Carbeed ee ay qabsatay 1967, dadka Reer Falasdiinna loo oggolaado aaya-ka-talintiisa xaqa ah, dowlad ay leeyihiinna yeeshaan.

JAALLEYAAL:

Tobankaa sannadood ee Kacaanku jiray waynagaa isu sheegnay waxaan soo marnay, sidaan nolosheenna u habaysnayey, midhaha aan dhalinay, iyo dhibaha innaga horyimid. Waxay ahaayeen toban sannadood oo taariikhda dadka Soomaaliyeed kaga qormay bogag aan tirtirmayn dhinaca walba oo la eego, ha ahaato dadaalka laga sameeyey isbeddelka dhaqaale iyo bulsho, qorista Afka iyo korriin dhaqanka, iyo hor-u-kaca heerka halganka gobanima doonka. Iyadoo dadka Soomaaliyeed leeyihiin dadaalka badan, haddana kaalmo la innoo geystay ma maqnayn, maxaa yeelay dunidu ma kala maaranto. Waxaannu halkan mahad ballaadhan ugu soo jeedinaynaa Dawladaha iyo dadyowga aan saaxiibka iyo walaalaha nahay ee gacan waxtar ah noo geystay muddadii aan halganka ku jirnay.

Ha yeeshee taa macnaheedu maaha inaan guulo ku seexanno. Had iyo jeer dhibuhu waa kuwii jira. Maantana waxa inna horyaal kuwo ka dhashay dhaqaalaha dunida ee isrogrogayo iyo culayska faragelinta shisheeyuhu ku hayso arrimaha mandaqadda. Dhibahaasu waxay saameeyeen maciishadda xoogsatada iyo danyarta. Cadowga dadka iyo Kacaankuna wuxuu rabaa inuu arrimahaas ka faa'iidaysto oo danihiisa gaadho. Waxaa kuwaas ka mid ah canaasiirta qabyaaladda ku ogaadhsanaya ee, iyagoo raba inay lugaha inna jiidaan, soo noolaynaya xanta, beenta, qaraabo-kiilka iyo laaluushka. Waxaase u dambeeya hungow. Dadka Soomaaliyeed iyagoo og halka ay ka soo baxeen, iyagoo dhan-dhansaday qiimaha halganka, ma noqonayaan qaar baasanbaasis lagu seexiyo. Way garanayaan in socodka Kacaan weligiiba leeyahay marxalado kala duwan, hakadna imaan karo. Waanay garanayaan in hakadkaas lagaga guulaysan karo adkaysi iyo halgan. Waxa maanta loo baahan yahay waa mitid iyo urursanaan, waa shaqada oon kordhinno innagoo xoogga saarayna wax-soo-saarka, waa ilaalinta, tashiilka iyo xannaanaynta xoolaha dalka, waa isku tashiga difaaca dalkeenna, waa isku kalsoonaan buuxda. Annagoo aamin buuxa ku qabna in dadka Soomaaliyeed halgankooda sii wedi doono, maalinba maalinta ka dambeysana guulo dhalin doono, iga guddooma SALAAN IYO HAMBALYO.